


Teetanaha

Xaashida xaqiiqada



Teetanada waxaa badanaa loo yaqaan daan go'. Waa cudur ay keento bakteeriyada Clostridium tetani.

Faafidda



Bakteeriyadu waxay ku nooshahay deegaanka, oo ay ku jiraan ciidda, boorka, iyo bacrinka. Bakteeriyadu waxay qofka jirkiisa ka geli kartaa maqaarka jeexan. Boogaha jirka ee ay gaaraan wasakhda, saxarada, candhuufta, iyo nabarrada la bujiyay ayaa u badan inay qaadaan cudurka. Teetanada ayaa ku dhici kara dhallaanka hadda dhashay haddii hooyadu aanay difaac lahayn oo xuddunta lagu gooyo qalab wasakhaysan.

Astaamaha iyo Calaamadaha



Gariirka Muruqyada
Daanka



Qandho iyo Dhidid
Lama Filaan ah



Madax-xanuun



Murqo iyo Kala-
goysyo Xanuun

Calaamadaha kale waxaa ka mid ah murqaha oo adkaada, liqidda oo ku dhibto, iyo qalal. Calaamadu waxay badanaa bilaabaan saddex maalmood ilaa saddex toddobaad ka dib u baylihidda, celcelis ahaan, illaa siddeed maalmood.




La hadal bixiyahaaga daryeelka caafimaadka haddii aad u malaynayso inaad teetano qabto. Teetanaha waxaa lagu ogaadaa iyadoo la eegayo astaamaha iyo calaamadaha. Ma jiro baaritaan lagu xaqiijin karo teetanada.

Dadka qaba teetanada waa in sida ugu dhakhsaha badan loo daaweeyaa.

Dhibaatooyinka ka dhasha

Dhibaatooyinka ka dhasha waxaa ka mid noqon kara:



Oof-wareen iyo Xinjiro dhiig ku yimaada Sambabada



Lafo Jajab



Dhiig Kar ama Garaaca Wadnaha oo Boobsiismo


Dhibaatooyinka kale waxaa ka mid ah gariirka cod dhaliyaha iyo/ama murqaha aad u isticmaasho neefsiga. Tani waxay adkeysaa neefsiga. Qiyaastii toban ilaa labaatan boqolkiiba dadka cudurkan qabaa way u dhintaan.

Kahortagga



- Tallaalku waa habka ugu wanaagsan ee looga hortago teetanada. CDC waxay ku talinaysaa in carruurta iyo dadka waaweynba ay qaataan qiyaasaha joogtada ah ee tallaalka teetanada. Dadka waaweyn waa in ay helaan qiyaas xoojin ah tobankii sanoba mar.
- Waxaad qaadi kartaa teetano wax ka badan hal mar, marka waa muhiim in aad qaadato tallaalka xitaa haddii uu horay kuugu dhacay teetanaha.
- Dhammaan boogaha waa in si wanaagsan loo nadiifiyaa. Booqo daryeel bixiyahaaga daryeelka caafimaad si loo daweyo boogaha.

Wixii xog dheeraad ah, Booqo:



1. www.maine.gov/dhhs/tetanus
2. www.cdc.gov/tetanus

Waxaad sidoo kale ka wici kartaa Maine CDC nambarka 1-800-821-5821.